| DOWLADDA PUNTLAND<br>EE SOOMAALIYA<br>XAFIISKA<br>MADAXWEYNAHA | | PUNTLAND STATE OF<br>SOMALIA<br>OFFICE OF THE<br>PRESIDENT |
| --- | --- | --- |
| Warbixinta 100ka Maalmood | Garowe | 26 April 2009 |

# 100-kii Maalmood ee ugu Horeeyay Xafiiska

## Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole)
## Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland

Xafiiska Madaxweynaha Puntland
Tel: +252 90 790999 ama +252 90 794030
E-mail: plpresidencyg@hotmail.com
26 April 2009

**HORDHAC** | Maadaama aan ahay Madaxweynaha Puntland, waxaa xil iga saaran yahay in aan dadka Puntland usoo bandhigo hawl qabadkii maamulkayga. Sababtaas weeye tan aan usoo bandhigayo warbixintan ku saabsan 100kii maalmood ee ugu horeysey ee Dawladaydu ay xilka haysay – taas oo ah markii ugu horeysay taariikhda dawladda Puntland oo la sameeyo arrin noocan oo kale ah. Warbixintu waxay faahfaahinaysaa tallaabooyinkii ugu horeyey ee aanu qaadnay si aan Dawlad Goboleedka uga badbaadino burbur ay qarka u saarnayd, isla markaasna waxaan soo bandhigaynaa waxyaabihii kala duwanaa ee aan ka qabanay qaybo kala duwan oo ay ka mid tahay: Amniga, Maaliyadda, Nidaamka Sharciga iyo Xiriirka Caalamiga ah.Waxaan kalsooni kuqabnaa in dadweynaha iyo qaybaha danaynaya in ay akhbaartani u muujin doonto sida ay dawladda uga go'an tahay horumarinta iyo nidaamka dawlad wanaagga ee Puntland.

Tallaabooyinkii ugu horeeyay ee dawladayda waxaa ka mid ahaa xoojinta tayada waxqabad ee Xafiiska Madaxweynaha, waxaan magacaabay saddex Wasiiru Dawlo oo qaabilsan: Barnaamijka Dimoqraadiyanta iyo Xiriirka Federaalka; Xukun Wanaagga; iyo Amniga. Waxyaabaha kale oo muhiimka ahaa waxaa ka mid ahaa magacaabista Taliyaha Ciidamada Daraawiishta, Garsoorayaal iyo Qareenno iyo in jaaha la saaray isbadal guud ee hagaajin nidaamka dawladda ee kasoo jiray Puntland ilaa asaaskii Dawlad Goboleedka sannadkii 1998.

Intii lagu dhex jiray 100-kii maalmood ee ugu horeeyay, waxaan booqanay dhammaan magaalooyinka waaweyn iyo tuulooyinka ku dhereran jidka 750 km, oo ay ka mid yihiin Boosaaso, Galkayo, Qardho, Buurintle, Xarfo iyo magaalooyin kale oo ku teedsan jidka weyn ee ku dherersan woqooyi-koonfur. Booqashadaydii Galkacyo, oo ku taal dhanka koonfureed ee Puntland, waxay ahayd mid si khaas ah xasuus u leh maadaama ay tusaale u tahay dadka Puntland sida ay u doonayaan dawlad tayo iyo xoog leh oo shaqaynaysa, sidaas waxay ku muujiyeen isu soo bax ay ka qayb qaateen kumanaan hooyooyin, aabayaal, dad da'weyn, arday, bulshada rayadka ah, iyo qaybaha kale ee bulshada kuwaas oo istaagnaa cad-ceed kulul ilaa 22 km meel u jirta Galkacyo iyaga oo sugayay imaanshada waftigayaga markii ugu horeysay intii aan xafiiska qabanay, taas oo xaqiiqo ahaan aan si weyn uga mahad celinayo. Rajada dadku aad ayay u saraysay, waxayna waafaqsan-tahay isbedelka uu doonayo Maamulku oo ka tarjumaysa dawlad karti leh oo shaqaynaysa oo noqonaya gobol tusaale u ah adeegga mudada dheer ee mustqabalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Intii lagu gudajiray maalmihii ugu horeeyay ee maamulkayga, waxaan xoogga saaray xiriirka bulshada anagoo adeegsanay warbaahinta iyo kulamo bulshada oo ay ka mid ahaayeen khudbado masaajidda maalmaha Jimacada, halkaas oo kumanaan Muslimiin ah ay kaga qayb galaan salaadaha jamaacada. Ujeedadayadu waa in aan dadweynaha u sheegno oo fahamsiino dawlad wanaagga, dimoqraadiyaynta iyo horumarinta dhaqaalaha.

Maalmaha inagu soo aadan waa kuwo dheer oo u baahan dhabar adayg, xaga dawladda iyo xaga shacabka. Waxaan idin waydiisanaynaa dulqaadkiina iyo in aad Allah inoo baridaan.

Mahadsanidin,

Cabdiraxman Mohamed Mohamuud (Faroole)
Madaxweyne, Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya.

**MUUQAAL GUUD |** Dawlad Goboleedka Puntland waa gobol is maamul oo ku yaal Waqooyiga Soomaaliya. Dawlad goboleedka waxaa la asaasay Agoosto 1998 kaddib markii kulan ballaaran oo ay ka soo qayb galeen siyaasiyiin, saraakiil militari, ganacsato iyo oday-dhaqameedyada bulshadu ay isugu yimaadeen magaalada Garoowe, caasumada Puntland. July 2001 ayaa waxaa waqtigii ka dhamaaday Dastuurkii Kumeelgaarka ahaa, taas oo keentay carqalad sharciyeed qarka u saartay gobolku in uu dhex galo dagaal ahli ah, taas oo dhamaatay 2002 kaddib markii ay dhexdhexadin ku guulaysteen oday-dhaqameedyada iyo hoggaamiyaasha bulshada.

Janaayo 2005, waxaa Puntland lagu qabtay doorasho ku dhacday si nabad galyo ah oo xukunka lagu wareejiyay Gen. Maxamuud Muuse Xirsi (Cadde), oo ahaa Madaxweynaha Puntland muddo afar sano ah ilaa Janaayo 2009. Doorasho cusub ayaa la qabtay bishaas, taas oo ay ku tartameen sagaal musharax (oo uu kamid ahaa madaxweynahii xilligaas Xirsi) iyo shan musharax madaxweyne-ku-xigeen oo u tartamay si nabad galyo ah oo ahayd doorasho dimoqraadiyad ah oo waadax ah. Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole) ayaa loo doortay madaxweynaha cusub ee Puntland, oo ku guulaystay 74% codadkii ay bixiyeen 66-ka Xildhibaan ee Baarlamaanka Puntland; Gen. Cabdisamad Cali Shire ayaa loo doortay madaxweyne-ku-xigeenka cusub ee dawlad goboleedka.

Muddo sanado ah Puntland waxaa is badalay siyaasad ahaan gudaha Puntland iyo guud ahaan Soomaaliya. Laakiin hal arrin oo muhiim ah oo aysan lahayn dawladda Puntland waxay ahayd nidaam asaas ah oo shaqaynaya oo sii jira marka uu yimaado maamul cusub.

Arrimahaas oo jiray ayaa Madaxweyne Cabdiraxmaan Faroole waxa uu la wareegay xafiiska si uu u hoggaamiyo Dawlad Goboleedka afarta sano ee soo socota. Ololahiisii doorashada waxa uu kaga qayb galay in dib u habayn lagu samaynayo dhammaan qaybaha kala duwan ee dawladda, oo ay ku jiraan hay'adahada amniga, agaasinka maaliyadda iyo horumarinta adeegga bulshada. Madaxweynuhu waxa uu ku baaqay isbadal dhab ah iyo in la aasaaso hay'adaha dawladda oo si rasmi ah u shaqaynaya oo leh maamul kala dambayn iyo nidaam hufan oo la dhaqan galiyo.

Waxyar kaddib markii la sameeyay Golaha Wasiirada Puntland, waxay Dawladu durbadiiba ku dhaqaaqday dardar galinta wax ka qabashada arrimaha muhiimka ah, oo ay kamid yihiin: Amniga, Maaraynta Maaliyadda, Nidaamka Caddaaladda, Nidaamka Dimoqraadiyaynta iyo Kobcinta/soo-noolaynta Dhaqaalaha. Maamulka cusub waxa uu xilka la wareegay waqti ay dunida soo food saareen arrimo la xiriira xagga amniga, oo ay ka mid yihiin argaggaxisada iyo burcad-badeeda. Waxa kale oo jiray dhibaatooyin maxalli ah oo aad u baaxad weyn oo raad iyo saamayn ku yeeshay qaybo badan oo Dawlad Goboleedka ka mid ah. Hawlahaas adag waxay u baahan yihiin hoggaan karti leh, adkaysi iyo wadashaqayn buuxda oo ka dhaxaysa dawladda, shacabka iyo beesha caalamka.

Dawladdu waxay kalsooni ku qabtaa in is-badalkii loo baahnaa uu bilowday oo ah jidka is-badalka qaab dhismeedka, waxaana ku qanacsan nahay taageerada joogtada ah ee shacabka. Waxaa intaas dheer, Dawladda Puntland waxay dadweynaha Puntland ugu baaqaysaa dulqaad inta lagu dhex jiro xilligan hawsha culus u baahan maadaama is-badalku uusan ku imaan hal maalin oo qura. Is-badalka la filayay waa nidaam socda oo u baahan joogtayn, oo qaadanaya waqti in uu dhaqan galo. Warbixintan, cinwaankeedu yahay 100-ka maalmood ee ugu horeeyay xafiiska, waa tallaabadii koowaad ee aan shacabka iyo inta danayneysa ku wargalinayno arrimaha ku saabsan waxqabadkii Maamulka Cusub tan iyo markii uu xafiiska la wareegay Janaayo 2009.

**AMNIGA DAWLAD GOBOLEEDKA |** 100-kii Maalmood ee ugu horeeyay Maamulka cusub kaalinta koowaad waxa u ahaa dib-u-dhiska, agaasimidda iyo u hawlgalida is-badal dhamaystiran oo lagu sameeyo dhinaca amniga si loo kasbado loona kordhiyo kalsoonida ay shacabku ku qabaan Dawladda. Hawshaas lagama maarmaanka ah waxaa adkeeyay xaaladda ciidamadii amniga ee ka jiray Puntland oo aan la siin mushahar iyo daryeel, arrintaas oo keentay in askar ay iskood hawshii ay hayeen isaga tagayeen laga soo bilaabo 2007. Maamulka cusub waxa uu dhaxlay nidaam aan lahayn ciidan Boolis oo rigli ah iyo ciidamada qalabka-sida oo aan lahayn sahay iyo hoggaan isku xiriirsan oo si degdeg ah amarka u kala qaadan kara laga soo bilaabo saraakiisha uga saraysa dawladda oo uu ku jiro Madaxweynaha. Qaab-dhismeedka amniga dawlad goboleedku waxa uu qarka u saarnaa in uu kala daato, marka laga reebo malaysiyo beeleedyo kooban oo iskood ugu hawl gala dano kooban. Sidaas daraadeed, Maamulka cusub waxa uu caqabado xooggan kala kulmay dib-u-habaynta malaysiyada ku salaysnayd hab-beeleedka iyo in dib loogu yeero saraakiishii hore ee xirfad-layaasha ahaa si ay u qabtaan masuuliyadda dib-u-dhiska qaybaha kala duwan ee ciidamada amniga si loo xaqiijiyo in sida saxda ah loogu dhaqbo qaanuunka sharciga ah.

Arrintaas isagoo ka duulaya, Madaxweynuhu waxa uu Col. Saciid Cabdi Faarax, oo ah sarkaal caan ah oo leh xirfad militari, u magacaabay Taliyaha Ciidamada Daraawiishta oo ah ciidan u xilsaaran difaaca xuduudaha Puntland, kuwaas oo sidoo kale loo adeegsan karo sugidda amniga gudaha iyagoo garabsanaya Ciidanka Booliska ee Degaanka. Magacaabista Col. Saciid waxay muhiim u ahayd dib u dhiska Ciidanka Daraawiishta. Ilaa markii Puntland la asaasay 1998, ciidanka Daraawiishtu waxay door weyn ka qaateen sugidda ammaanka ayagoo xaqiijinaya nabadgalyada shacabka iyo kalsoonidooda. Sannadkii 2004 ayaa Mudane Cabdullaahi Yuusuf Axmed, hoggaamiyahii hore ee Puntland, waxa uu noqday Madaxweynahii Dawladda Federaalka Kumeelgaarka (DFKMG) ee Soomaaliya, ciidan xoog leh oo gaaraya 3,500 oo ah ciidanka Daraawiishta Puntland ayaa u socdaalay Konfurta Soomaaliya si ay uga mid noqdaan cududda Ciidanka Qaran ee DFKMG. Maqnaanshaha ciidankaas oo watay qalaabkoodii, oo ay kamid yihiin gawaaraada hubaysan iyo kuwa xamuulka, waxay bannaysay amnigii Puntland taas oo horseeday hoos u dhac joogto ah ee ciidanka, taas oo qayb ka noqotay ammaan darrida.

Taliyaha cusub waxa uu qabtay hawl aad u wanaagsan, isagoo dib ugu yeeray ciidamadii hore iyo in shan xarumood oo tababar laga furay Puntland. Ilaa hadda, kumanaan Ciidamada Daraawiishta ayaa dib loo meeleeyay, waxaana hadda u socda tababar. Waxaa intaas dheer, in Maamulka Cusub uu dadaal xoog leh ugu jiray kala diridda iyo yaraynta malaysiyada ayadoo yoolku yahay in la casriyeeyo ciidanka ammaanka si ay u noqdaan tiro la maarayn karo oo qaata mushahar, helana daryeel caafimaad iyo waxyaabaha kale oo baahidooda kabaaya. Dawladda waxay agab xoog leh kubixisay kala diridda maleeshiyaadka, gaar ahaan kuwa xanuunsan, naafada iyo da’weynta. Sidoo kale waxaa si wanaagsan loo diiwan galiyay malaysiyada la kala diray si loo xaqiijiyo in aysan kusoo laaban ciidamada amniga Puntland. Maamulka Cusub waxa uu ansaxiyay in ciidamada amnigu ahaadaan tiro macquul ah si loogu asaaso saldhigyo ku yaal goobo muhiim ah oo ka tirsan Dawlad Goboleedka, gaar ahaan xarumaha magaalooyinka dadka badani deggan yihiin iyo meelaha ku dhereran xeebta, si ay u sahlanaato in si dhaqso ah looga hawl galin karo meel kasta oo ka mid ah Dawlad Goboleedka haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Taas waxaa dheer, in dib u dhisku uusan sahlanayn, sidoo kale Ciidanka Boolisku waxaa ku socda dib u habaynta loo bahaan yahay. Isku daygaasi waa hawl aad u xooggan oo la soo deristay Dawladda taas oo u baahan dhaqaale aad u farabadan oo lagu bixiyo mushaharka iyo raashinka, dib u habaynta iyo tababarka Ciidanka Booliska oo durba ay dawladdu mushahar siiso; taas oo jirta, badankooda waxaa loo malaynayaa in ay yihiin magacyo aan jirin oo ay sameeyeen saraakiil boolis ah oo musuqmaasuq ah. Tusaale ahaan; waxaa la soo ogaaday in ay jiraan ciidamo boolis ah oo aad

u xad dhaaf ah oo mushahar ka qaata dawladda dhammaan goballada Puntland; haba ugu badnaatee Boosaaso; laakiin hay'ad (odhod ah) ee dawladda oo madaxbannaan waxay heshay liis booliis ah oo ay ka buuxaan magacyo aan jirin oo macmal ah. Maamulka cusub waxa uu sii wadi doonaa in uu kala hufo magacyadaas aan jirin ilaa laga agaasimo oo laga diiwaan galiyo liiska Ciidanka Daraawiishta, Booliska Maxalliga iyo Ciidamada Asluubta.

Maamulka Cusub waxa uu Garoowe iyo Galkacyo ka bilaabay olole booliis si loo joojiyo hubka sida waadax ah loo muujinayo taas oo guulo weyn laga gaaray. Nidaamka siyaasadeed ee dawladda ee ku aadan ciidanka booliska waa: in la dhiso nidaam adag oo ku salaysan kala dambayn si loo xaqiijiyo hawlqabad sugan iyo nidaam la raaco. Dhammaan booliska cusub ee la qorayo waxaa lagu tababaraa in ay dhawraan qaanuunka, xuquuqda muwaadiniinta iyo nidaamka ku haboon booliiska. Ciidamada Booliska faracooda loo yaqaan Birmadka, oo ah unug booliis oo wareega, waa la fidinayaa ayagoo lagu xoojinayo saraakiil ka timid gobolada kala duwan si ay uga qayb qaataan sugidda amniga dhammaan Dawlad Goboleedka, gacana siiyaan saldhigyada booliska markii loo baahdo.

Intii lagu dhaxjiray 100-kii Maalmood ee ugu horaysay, waxaa dhacay saddex iska hor imaad beeleed taas oo ay culimada iyo oday-dhaqaeedyada oo taageero ka haysta Dawladda Puntland ay ku xalliyeen Shareeecada Islaamka iyo xeer Soomaali soo jirey qarniyaal. Dawladdu waxay aaminsan tahay in Shareecada Islaamka iyo nidaamka dhaqanka in ay yihiin kuwo xal nabadeed lagaga dhalin karo meelaha baadiyaha ah, halkaas oo reer guuraagu ay mararka qaarkood iskaga hor yimaadaan khayraad gabaabsi ah. Waxa kale oo dhacay afduub loo gaystay muwaadin Pakistani ah oo sitay baasaboor British ah bishii Febraayo, taas oo dawladda xaalad ku noqotay; ugu dambayntii waxaa la sii daayey isagoo bad qaba kaddib markii ay abaabul soo furasho agaasimeen ciidamada Ammaanka ee Puntland.

Dawladdu waxay magacawday Guddiga Dib-u-agaasimidda si ay hormuud ugu noqdaan dib u habaynta qaybaha amniga. Guddigaasi waxa uu xog iyo talooyin wax ku ool ah u gudbiyay Puntland, ku saabsan ciidamada la heli karo, qalabka iyo agabka shaqaynaya.

Dhanka kale, Madaxweynuhu waxa uu Wakiil Gaar ah u magacaabay la-dagaalanka Burcad Badeedda oo u xilsaaran dhismaha Ciidan Xeebeed la dagaalama burcad badeedda oo ujeedadoodu tahay in ay burcad-badeedda kula dagaalamaan badda iyo berriga, maadaama burcad badeeda xeebaha Soomaaliya ay heerkii ugu sareeyay gaartay sanadahan dambe.

Maamulka Cusub waxa uu si buuxda u fahamsan yahay qiimaha ay leedahay nabadda iyo ammaanku. Inkasta oo ay waqti qaadanayso in dib u habayn lagu sameeyo qaybaha amniga, Dawladdu waxay sii wadi doontaa in ay hanti xooggan ku bixiso mushahar iyo taageero siinta ciidamada Amniga. Taas oo jirta, Maamulka Cusub waxa uu fahamsan yahay hantida ku baxaysa amniga in culays ku tahay dalabka dadweynahu ku doonayaan isbadal, sidaas daraadeed, waxaa maamulku waqti ku bixinayaa raadinta ilo kale oo dhaqaalahaas laga helo, gaar ahaan beesha caalamka.

**MAALIYADDA/DHAQAALAHA |** Eedaynta in dhaqaalaha dadweynaha si aad u khaldan loo maamulay waxay ka mid ahayd kuwa ugu muhiimsan doodahii 2008 xilligii ololahii doorashada. Maamulka Cusub waxa uu dhaxlay nidaam dhaqaale oo Dawlad Goboleedka u jihaynayey dhaqaale burbur. Markii Madaxweyne Cabdiraxmaan Faroole uu xilka la wareegay, shaqaalaha dawladda – sida u adeegayaasha bulshada iyo ciidanka amniga – wax mushahar ah lama siin muddo bilo ah. Waxaa jiray arrin ku saabsan liiska magacyo aan jirin oo laga badbadiyay oo u diiwaan gashanaa in ay mushahar ka qaataan dawladda. Tusaale ahaan, Wasaaradda Maaliyadda waxaa diiwaanka ugu qornaa 10,000 oo ah ciidamo amniga oo dawladda mushahar ka qaata, kuwaas oo si joogto ah mushahar u qaadanayay, taas oo culays ku ahayd kharashka ka baxaya dawladda.

Wasaaradda Maaliyaddu waxay qabatay hawl aad u wanaagsan oo ay ku hagaajinayso nidaamka soo ururinta dakhliga ayadoo xaqiijinaysa in mushaharka si joogto ah loo siiyo u adeegayaasha bulshada iyo ciidanka amniga; tusaale ahaa dhammaan shaqaalaha dawladda waxaa mushahar la siiyey bilihii Janaayo, Febraayo iyo Maarso ee 2009. Marka laga reebo oo keliya Ciidanka Daraawiishta, maadaama ay weli socoto diiwaan galinta liiskooda saxda ah; in badan oo kamid ah Ciidanka Daraawiishta waxaa mushahar la siiyey bishii Maarso, dhammaantoodna waxaa si joogto loo siinayay raashin. Maamulka Cusub qorshahiisu waa in uu joogteeyo mushaharka la siinayo dhammaan shaqaalaha dawladda si loo xaqiijiyo in siyaasadda dawladda la hirgaliyo waqtiga ku haboon si karti ku jiro oo joogto ah. Maamulka Cusub waxa uu dhammaadkii Janaayo 2009 Baarlamaanka Puntland u gudbiyay Miisaaniyadda kumeel gaarka ah ee loogu talo galay saddex-bilood. Miisaaniyaddaas ku meelgaarka ah waxa ay ku salaysan tahay miisaaniyaddii caadiga ahayd ee 2008 ee Dawladda Puntland, taas oo yoolku ahaa in mushahar la siiyo shaqaalaha dawladda; oo ay ku jiraan ciidamadda amniga, iyo in la maalgaliyo adeegsayada loo baahan yahay ee wasaaradaha kala duwan iyo hay'adaha kale ee dawladda. Baarlamaanka Puntland waxa uu ansixiyay miisaaniyadda kumeelgaarka ah ee saddexda bilooda, waxana uu Maamulka Cusub ka rajaynayaa in uu dhammaadka bisha April 2009 gudbiyo miisaaniyadda 2009 ee caadiga ah.

Maamulka Cusub, oo adeegsanaya Wasaarada Maaliyadda, waxa uu abuuray nidaam heer Waraasareed iyo heer hoose leh si loo xaqiijiyo maarayn wanaagsan ee ku haboon dhaqaalaha, oo si waadax ah loola socdo, ayadoo la adeegsano warbixino iyo kormeer joogto ah. Wasaaradda Maaliyadu waxay samaysay nidaam cusub oo ah waraaqaha canshuur aruurinta si looga gudbo nidaamkii si khaldan u adeegsiga ee laga dhaxlay sanadihii hore. Dukumiinta cusub ee Wasaaradda Maaliyaddu waxa uu Dawladda ka caawiyay in ay la xiriirto ganacsiyada, islamarkaasna dib u abuurto kalsoonida lagu qabo Dawladda.

Dib u habaynta maamulidda Hantida dadka ka dhaxaysa/Maaliyadda waxaa ka mid ah Isu-dheeli-tirka Miisaaniyadda iyo turxaan bixinta sicir bararka ee Qiyaas qaadashada Qiimaha Maciishadda si suuqa ganacsiga looga dhigo mid la socda casriga maanta. Turxaan bixintaasi waxay wax yar kordhisay kharashka usoo xaroonaya dawladda, taas oo Dawladda ka caawisay bixinta mushaharka iyo adeegyada loo baahan yahay. Maamulka Cusub waxa uu fahamsan yahay in dadwaynuhu ay Dawladda Puntland ku aamineen hantida shacabka si ay u difaacdo nolosha dadka iyo hantida iyo si ay u gaarto nidaam horumarineed. Dawladda waxaa kaalinta ugu saraysa ugu jira sidii ay qaybaha Maaliyadda iyo Ganacsiga uga dhigi lahayd kuwo si waadax ah loo arko oo ay garab socoto warbixino ku haboon.

Dawladdu waxay sii wadi doontaa horumarinta iyo casriyaynta kartida iyo waxqabadka Wasaaradda Maaliyadda, taas oo ah xuddun is-badalka si loo maareeyo dakhliga dawladda, islamarkaasna xaqiijin la siiyo dadwaynaha. Dawladda waxaa ka go'an in si xilkasnimo ah loo

maareeyo nidaamka hantida dadka u dhaxaysa, iyo in si joogto ah dadwaynaha loola socodsiiyo kharashka ay bixiso dawladdu iyo meesha lagu bixiyo.

**ADEEGGA BULSHADA** | Daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada Maamul Goboleedku waxay ahaayeen kuwo aad u liita laga soo bilaabo markii la asaasay Puntland, sababtoo ah ayadoo aan qaybahaas hore loogu qoondayn hanti ku filan. Taas ayadoo la eegayo, ma jiraan wax haba yaraatee ay maamuladii hore isku taxalujin ah oo ku aadan in ay taallaabooyin horumarineed ka gaystaan xagga maalgalinta dugsiyada dadwaynaha ee ay dawladdu maamusho iyo in si joogto ah mushahar loo siiyo macallimiin. Sidoo kale haba yaraatee maamuladdii hore asaaska uma dhigin nidaam daaryeel caafimaad oo shaqaynaya oo ay dadka saboolka ahi ay ka heli karaan daawayn xagga caafimaadka ah oo ay awoodi karaan. Labadaas qaybood (Caafimaadka iyo Waxbarashada) waxay ku tiirsanaayeen qaybo gaar loo leeyahay iyo kooxo deeq-bixiyaal ah oo isugu jira kuwo degaanka iyo caalami oo kaabayay adeegyadaas lagama maarmaanka ah.

Wasaaradda Waxbarashadu waxay bilawday kulammo joogto ah oo ay la yeelanayso macallimiinta iyo mulkiilayasha dugsiyada ee dhammaan Puntland ayadoo la higsanayo in la xaqiijiyo yoolka in la asaaso Manhaj Waxbarasho oo dhamaystiran ee dugsiyada dadwaynaha ee Puntland. Tan iyo markii ay burburtay dawladdii dhexe ee Soomaaliya sannadkii 1991, manhajka waxbarashada ee lagu dhigo dugsiyada Dawlad Goboleedka waxaa laga keenayay dalalka deriska ah, sida Kenya iyo Imaaraadka Carabta (U.A.E.). Arrimahaas oo jira ayaa Maamulka Cusub waxa uu ku dadaalayaa sidii uu u falanqayn lahaa nidaamka waxbarasho ee hadda ka jira Dawlad Goboleedka iyo soo agaasimidda iyo soo jeedinta nidaam ku haboon oo shaqaynaya oo ah muqarrar waxbarasho oo ka dhaxeeya dhammaan dugsiyada Puntland.

Bishii Febraayo 2009, Wasiirka Waxbarashada Puntland waxa uu booqday Ethiopia oo uu kaga qayb galay kulan uu la yeeshay Hay’adda Qarammada Midoobay ee UNICEF (United Nations Children’s Fund) iyo hay’adda AET (African Education Trust), halkaas oo waftigii Puntland ay la ogolaadeen xubnaha beesha caalamka in dib loo bilaabo barnaamijkii tababarka macallimiinta ee loo yaqaan SCOT. Dawladdu waxay ku dadaalaysaa ay in ay qaado tallaabooyin ay ku xaqiijinayso xiriir adag oo ay la sii wado hay’adaha caalamiga ah iyo dawladaha adduunka si ardayda Puntland loogu helo fursado ay ka mid yihiin waxbarasho dalka dibadiisa ah oo ay ka faa’iidaysaan.

Dhanka daryeelka caafimaadka, Wasaaradda Caafimaadka, oo ay hoggaamiyaan xirfadlayaal xagga cilmiga caafimaadka, waxay durbadiiba qaaday tallaabooyin dhiiri galin leh oo ay ku horumarinayso goobaha caafimaadka, taas ayadoo laga duulayana booqday gobollo badan si loo kormeero oo loo qiimeeyo goobaha caafimaad iyo cisbtaalada waaweyn. Wasaaraddu waxay soo aruurisay xog ku saabsan xaaladda uu ku sugan yahay nidaamka iyo heerka daryeeelka caafimaad ee Puntland, taas oo ay kamid tahay booqashooyin cisbitaalada gaarka loo leeyahay oo lala yeeshay wada hadallo la xiriira sidii loo hagaajin lahaa nidaamka daryeelka caafimaad. Bishii Febraayo, Madaxweyne Cabdiraxmaan Faroole waxa uu ku dhiiri galiyay ganacsadata Boosaaso in si loo ballaariyo Cisbitaalka Guud ee Boosaaso ay deeq u fidiyaan si cisbtitaalku u hagaajiyo daryeelka uu siinayo bukaan socodka, waxaana la filayaa in mashruucaasi dhawaan bilawdo.

24-kii Maarso ayaa Wasiirka Caafimaadku waxa uu magaalada Qardho ee caasumadda gobolka Karkaar ka furan xarun TB ayadoo la xusayay Maalinta TB-da iyo baraarurjinta dadwaynaha arrimaha caafimaad ee la xiriira Cudurka Qaaxada. Munaasabadaasi waxay qayb ka tahay isku dayga joogtada ah ee dawladda si loo xaqiijiyo wacyi galin xagga caafimaadka ee guud ahaan Puntland. Dawladda waxaa ka go’an in ay soo bandhigto ololaha la xiriira daryeelka caafimaadka, gaar ahaan baraarujinta dadweynaha ee barashada la xiriirta ka hortagga cuduradda.

Maamulka Cusub waxa uu sii wadi doonaa casumaadda hay’adaha caalamiga ah si ay uga qayb qaataan waxbarahada iyo caafimaadka. Dawladdu waxay fahamsan tahay rabitaanka dadwaynaha ee ah in waxbarasho wanaagsan ay helaan dhallinyaradu iyo in daryeel caafimaad uu helo qof

kasta. Sidaa daraadeed, Maamulka Cusub waxaa afarta sano ee soo socota kaalinta ugu saraysa ugu jira horumarinta qaybaha adeegga bulshada.

Maamulka Cusub waxa uu kordhiyay Miisaaniyadda loo qoondeeyay qaybaha adeegga bulshada si loo horumariyo waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka ee Dawlad Goboleedka. Waxa kale oo Maamulka Cusub uu rumaysan yahay in Puntland u baahan tahay taageero weyn oo ku aadan miisaaniyadda loo qorsheeyay si loo gaaro yoolkaas lagu haminayo ee muhiimka u ah dadka Puntland, si hore loogu socodsiiyo nidaamka waxbarashada iyo nidaam lagu kalsoon yahay ee daryeelka caafimaadka dadweynaha.

**NIDAAMKA CADDALADDA |** Maamulka Cusub ee Puntland waxa uu aqoonsan yahay in hagaajinta nidaamka caddaaladdu uu qayb aad u baaxad weyn ka yahay dawlad wanaaagga. Nidaamka caddaaladdu waxa uu qayb aad muhiim u ah ka tahay dawladda sababo badan awgood, ay ka mid yihiin: xaqiijin in awoodda xukunku qaybsan yahay, in loo siman yahay sharciga, iyo dhawritaanka qanuunka/sharciga oo shaqaynaya oo caddaalad ah.

Markii uu xilka la wareegay Maamul Cusub, nidaamka caddaaladdu waxa uu ku sugnaa xaalad la dayacay: qolalka xabsigu waxa uu ahaa ciriiri, kuwaas oo badanaa maxaabiista ciriiri ku ah; boqolaal maxaabiis ah ayaa xabsiyada ku jiray ayagoo aan maxkamad la soo taagin, ma jirin nidaam ku haboon oo ku filan in lagu dhagaysto dacwadaha madaniga iyo dacwadaha fal-dembiyeedka; iyo guud ahaan ayadoo aysan jirin xiriir wada shaqayn oo ka dhaxayay qaybaha kala duwan ee nidaamka caddaalada, sida booliska, maxkamadaha iyo xabsiyada.

Dawladda kaalinta koowaad in uu ugu jiro dib u habaynta nidaamka caddaalada waxaa asaas u ah hagaajinta kartida waxqabad ee ciidanka ilaalada xabsiyada Puntland. Ciidankaas xubnaha hadda ka tirsan waxaa la siiyay tababar dheeraad ah, waxaana waxyar loo kordhiyay mushaharka. Maamulka Cusub waxa kale oo uu bilaabay dibu habaynta Xabsiga Dhexe ee Boosaaso si loo kordhiyo inta uu qaado, islamarkaasna loo hagaajiyo ammaankiisa.

Waxaa intaas dheer, in Maamulka Cusub uu magaalooyinka waaweyn ee Puntland u magacaabay garyaqaano iyo qareeno cusub kaddib markii laga qaaday imtixaan loo galay tartan adag, taas oo ujeedadu ahayd in la yareeyo culayska saarnaa nidaamka caddaaladda. Dawladdu waxay kordhisay mushaharka qaybta caddaaladda ee miisaaniyadda caadiga ah ee 2009, taas oo loo gudbinayo Baarlamaanka Puntland dabayaaqada April.

Waxaa maxaabiista oo dhan tusaale u ah, in bishii Febraayo 2009 uu Madaxweynuhu cafis u fidiyay 66 maxbuus oo ku jiray Xabsiga Dhexe ee Boosaaso. Labo maxaabiis hore ahaa ayaa si gaar ah loo xushay oo ay Dawladdu shaqaalaysiisay si uu uga shaqeeyaan gudaha nidaamka xabsiga, islamarkaasna maxaabiista u baraan dhaqan-iyo-dabeecad wanaagga iyo sidii loogu samayn lahaa dhaqan celin bulsho, waxaana barnaamij-kaas ka soo ifbaxaya natiijo wanaagsan.

Yoolka mudada dheer waxaa ka mid ah in la dhamaystiro xabsiga weyn ee Qardho, caasimada Karkaar. Xabsigaasi waxa uu leeyahay qaad weyn, marka la dhamaystirana waxan uu noqon doonaa xabsiga ugu weyn Puntland. Ujeedadu waa in la dhimo culaska xabsiyada Puntland, iyo in la asaaso nimaad caddaalad oo suurta galinaya in si dhaqso ah dacwad maxkamad loo hor geeyo maxaabiista.

**XIRIIRKA CAALAMIGA AH |** Dawladda Puntland waxay u heelan tahay midnimada Soomaaliya oo hal qaran ah, oo leh hal calan oo Muqdisho u tahay caasimad. Maamulka Cusub waxa uu sidaas oo kale ugu heelan yahay xaqiijinta danaha dadka Puntland in lagu gaari karo dhismaha Dawlad Federaal ah ee Soomaaliya oo shaqaynaysa oo la maarayn karo.

Taas oo jirta, Dawladdu waxay ogtahay in koonfurta-gobolada dhexe ee Soomaaliya ay yihiin meel siyaasad ahaan aan daganayn, sidaas daraadeed Dawladdu waxay ansixisay siyaasadii hore loo askumay si loo ilaaliyo danaha Puntland ilaa mustaqbalka Soomaaliya laga dhisayo Dawlad Federaal ah oo ku salaysan nidaam loo dhan yahay iyo nidaam dib-u-heshiisiin taas oo ku hawl gasha Dastuur Federaal ah oo marka la samaynayo ay si buuxda uga qayb qaataan dawladda federaalka iyo maamul goboleedyada (sida Puntland) si looga feejignaado in ay meesha soo galaan dano cid u gaar ah, oo la xaqiijiyo xuquuqda dawlad goboleedyadu ku leeyihiin nidaamka federaalka.

Bishii Febraayo 2009, Maamulka Cusub waxa uu casumaad u fidiyay hay’adaha Qarammada Midoobay, Hay’adaha aan dawliga ahayn ee caalamiga ah (NGO) iyo qaybaha kale ee danaynaya in ay yimaadaan caasimada Puntland ee Garoowe si ay uga qayb galaan shirweyne ujeedadiisu ahay “Dardar galinta xiriirka Beesha Caalamka.” Dawladdu waxay soo bandhigtay qorshaheeda ku aadan xiriirka hay’adaha deeq bixiyaasha caalamiga ah ee ku saabsan adeegga gargaarka bini’aadamino ee hore loo joojiyay arrimo dhawr ah oo jiray sanadihii hore awgeed, oo ay ka mid ahayd amni darro iyo is-faham la’aan u dhaxaysay dawladda iyo deeq bixiyaasha.

Sida ku cadayd warqad ku taariikhaysnayd 4-tii Maarso 2009, Xafiiska Xiriirka Gargaarka Bini’aadamino ee Soomaaliya waxaa uu sheegay in: “Madaxweynaha Puntland iyo Golahiisa Wasiiradu ay soo bandhigeen aragti dheer oo ku saabsan horumarinta Puntland oo ay ka mid tahay u heelanaanta Dib-u-hayanta Qaybaha Amniga, samaynta bay’ad ammaan ah… waxa kale oo ka mid ah agaasimidda Miisaaniyad dheeli-tiran oo ay qayb ka tahay sida ay uga go’an tahay in dawladdu kordhiso kharashka ku baxaya qaybaha caafimaadka iyo waxbarashada, hagaajinta heerka dhaqaalaha oo si waadax ah loola soconayo, iyo sida ay uga go’an tahay bixinta mushaharka qaybaha adeegyada bulshada.”

Maamulka Cusub waxa uu sii wadi doonaa xoojinta xiriirka ganacsi iyo amni ee uu la leeyahay dalalka deriska ah, sida Ethiopia, Djibouti, Kenya iyo Yemen. Bishii Maarso, wafti uu hoggaaminayo Madaxweyne Faroole ayaa booqday Ethiopia iyo Djibouti, waftigaas oo uu ka mid ahaa Wasiirka Qorshaynta iyo Xiriirka Caalamiga iyo Wasiiru Dowlaha Dimoqraadiyaynta iyo xiriirka Federaalka. Waftigii Dawladda Puntland waxaa lagu soo dhaweeyay Addis Ababa iyo magaalada Jabuuti, waxaana Madaxweyne Faroole uu kulan rasmi ah la yeeshay Ra’iisul Wasaare Meles Zenawi iyo Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, hoggaamiyaasha Ethiopia iyo Jabuuti sida ay u kala horeeyaan.

Maamulka Puntland waxa ay isla fahamsan yihiin dawladaha Ethiopa iyo Jabuuti arrimo ay ka mid yihiin danaha labada dhinac ka dhaxeeya sida ganacsiga iyo amniga. Waftigu waxay kulamo heer-wasiir ah la yeesheen wasiiro kala duwan, sidoo kale waxay kulamo la yeesheen safaarado kuyaal Addib Ababa iyo magaalada Jabuuti. Booqashada Madaxweynuhu ku tagay dalalkaas waxay ahayd kulan hordhac ah ee dalalka gobolka iyo ergo dalalka dibadda ka ah Afrika.

Intii ay socdeen kulamadaasi, waftigu waxa ay ku celceliyeen sida ay Dawladda Puntland meesha adag uga taagan tahay nidaamka dawladda federaalka ee la jaanqaada beesha caalamka qorshahooda dib u heshiisiin ee Soomaaliya. Waftiga Madaxweynuhu waxa uu magaalada Jabuuti kula kulmay Ergeyga Gaarka ah ee Qarammada Midoobay, Mudane Axmed Ould-Cabdallah,

waxayna Dawladdu si aad u qoto dheer ugu sharaxday halka ay ka taagan tahay nidaamka dib u heshiisiinta qaran ee Soomaaliya.

Bartamahii bishii April, Madaxweyne Cabdiraxmaan Faroole waxa uu booqday Nairobi, Kenya, halkaas oo uu kulamo kula yeeshay safiirrada dalalka Galbeedka, oo uu ka mid yahay Safiirka Maraykanka u fadhiya Kenya Mr.Michael Renneberger. Dawladda Puntland waxay beesha caalamka u bandhigtay qorshe lagula dagaalamayo burcad-badeedda, kaas oo ku baaqay wada shaqayn iyo xiriir arrintaas ku saabsan oo dhex mara maraakiibta shisheeye ee dagaalka ee ku sugan xeebaha Soomaaliya iyo maamulka maxalliga; oo ah Dawladda Puntland. Waftiga Puntland waxay la kulmeen xubno ka socday Qarammada Midoobay, Midowga Afrika, Midowga Yurub, Safiiro dalal badan oo ay ka mid yihiin Italy, France, Canada, Germany, Sweden iyo saraakiil ka socotay Kenya, sida Ku-xigeenka Afhayeenka Baarlamaanka iyo Wasiirka Difaaca. Qorshaha Madaxweynaha ee la dagaalanka Burcad badeeedda aad ayay u soo dhaweeyeen xubnahii ka socday beesha caalamka, waxaana Madaxweynuhu dhammaan qaybaha kala duwan ee beesha caalamka ku casumay in ay soo booqdaan Puntland.

Dawladdu waxay sii wadi doontaa dadaalka ay ugu jirto agaasimidda xiriir wanaagsan oo ay la yeelato dalalka deriska ah, dawladaha adduunka iyo ururada caalamiga ah, sida Qarammada Midoobay. Siyaasadda Dawladda ee ku wajahan xiriirka caalamiga ah waa raadinta taageero si loo wanaajiyo laamaha dawladda, adeegga bulshada, dib u dhiska kaabayaasha dhaqaalaha, si beesha caalamka ee adduunka loogu muujiyo in dadka Soomaaliyeed ay karti u leeyihiin in ay dib u asaasaan dawlad goboleed xejinaysa xornimda iyo jiritaanka Soomaaliya oo ku hoos jirta qaabka federaalka.

**KHAYRAADKA DABIICIGA AH |** Soomaaliya waa dal hodan ku ah khayraad dabiici ah oo farabadan ee dhulka iyo badda ku dhereran xeebta. Puntland waxay dhacdaa goob istaraatiiji ah oo ah cirifka Geeska Afrika, halkaas oo ah marin-badeed albaab u ah Yurub iyo Aasiya. Taariikh ahaan, gobolkan waxaa loo yaqaan "Dhulkii Punt" halkaas oo hoggaamiyaashii Masaaridii Hore booqdeen, oo ganacsi gaar ah ugu yimaadeen sida fooxa.

Sanadahii 1980-naadkii, shirkado waaweyn ee shidaalka sahamiya ee reer galbeedka ayaa qandaraasyo la saxiixday madaxweynihii Soomaalia ee xilligaas Maxamed Siyaad Barre si ay batrool uga samahiyaan qaybo kala duwan ee Soomaaliya. Dhanka Gobolada Puntland ee woqooyi-bari, shirkadda weyn ee Conoco (oo hadda ah Conoco-Phillis) oo ah shirkad Maraykan ee batroolka baarta ayaa heshay qandaraas xuquuq u siinayay in ay sahamiso qayb ballaaran oo ka mid ah Puntland. Taas oo jirtay, ayaa 1991 shirkadihii waaweynaa ee reer Galbeedku waxay cuskadeen qodobka ah in ay dhacday awood aan wax laga qaban karin (force majuere), waxayna la baxeen shaqaalahoodii markii Soomaaliya uu ka dhacay dagaalkii ahliga.

Bartamahii 2005 ayaa madaxweynihii xilligaas ee Puntland Maxamuud Muuse Xirsi (Cadde) waxa uu Qandaraas la saxiixday shirkadda macdanta qoda ee Range Resources Ltd oo xarunteedu tahay Australia, taas oo la siiyay gabi ahaanba xuquuqda gaarka ah ee sahaminta dhammaan batroolka iyo macdanta gobolada Puntland oo dhan. Madaxweynaha cusub ee Puntland, mudane Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole), markii uu ku guulaystay doorashadii Janaato 2009 waxa uu goob fagaare ah ka sheegay in Maamulka Cusub uu mabda' ahaan aqoonsan yahay heshiiskaas sahaminta, laakiin waxa uu cadeeyay in heshiiskaasi uu hadda ku jiro dib u eegid.

100-kii Maalmood ee ugu horaysay Xafiiska, Wasaaraddii Macdanta iyo Batroolka waxaa hoos looga celiyay heer-Wasaaradeed waxaana laga dhigay Hay'ad hoos timaada Xafiiska Madaxtooyada maadaama Maamulka Cusub uu doonayo in uu yoolka saaro arrimaha degdeg ah, sida amniga iyo maaraynta maaliyadda. Agaasimaha cusub ee Macdanta iyo Batroolku waxa uu dhaxlay shaqaale aan wax mushahar ah la siin bilihii ka horeeyay, kiradii xafiiska oo aan la bixin iyo nidaam gaadiid oo aan jirin.

Maamulka Cusub waxa uu u yeeray shirkadda Africa Oil Corp oo ah shirkad sahamin oo Canadian ah oo jaal la ah a Range Resource, si ay u soo bandhigto dukumiintiga waxyaabihii ay ku ogaatay sahamintii ay ku samaysay Dooxada Dharoor. Taas oo jirta, ilaa hadda shirkadda Africa Oil Corp wax dukumiinti ah kuma soo wareejin Maamulka Cusub, sida xogtii sahamintii ee ay ku ogaadeen baaritaankii nooca seismic ee aaggaas.

Maamulka Cusub waxa uu u yeeri doonaa guddi khubaro ah oo dib u eega qandaraaska batroolka, si loo xaqiijiyo in qandaraaskaasi yahay mid u dhigma nidaamka caalamiga ah. Siyaasadda Dawladda Puntland ee ku wajahan khayraadka dabiiciga ah ee laga helo dhulka ama badda waa in dawlad goboleedyadu yeeshaan xuquuqda lahaanshada ee nidaam federaalku u xaqiijinayo si caddaalad ah loola qaybsado Dawladda Federaalka si ay uga faa'iidaan dadka degaanka maxalliga iyo dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

**XIRIIRKA WARBAAHINTA** | Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya waxa uu taariikh u leeyahay in uu kamid yahay gobolada Soomaaliya ee ugu xiriir wanaagsan warbaahinta. Maamulka Cusub waxa uu rajaynayaa in uu sii wado oo sii xoojiyo sumcaddaas wanaagsan ayadoo loo marayo taageerada ururada warbaahinta, sida Ururka Midowga Saxaafadda Puntland ee loo soo gaabiyo M.A.P. Wasaaradda Saxaafadda iyo M.A.P waxaa dhex maray kulamo aad u dheer oo ku saabsan doorka ay warbaahintu ku leedahay dalwadda iyo bulshada; waxyaabihii laga wada hadlay waxaa ka mid ahaa anshaxa weriye-nimada, hab dhaqan wanaagga warbaahinta iyo horumarinta in si dhexdhexaanimo ah wararka loo tebiyo.

Madaxweyne Cabdiraxmaan Faroole waxa uu si gaar ah ula kulmay weriyaal ka socday qaybo kala duwan oo warbaahinta ah, asagoo gaar ahaan kala hadlay xiriirka warbaahinta iyo waxa laga rajaynayo, iyo gaar ahaan siyaasadda dawladda. Maamulka Cusub waxa uu weriyaasha weydiistay in ay dhawraan anshaxa warbaahinta si loo yareeyo muranka dhexmara Dawladda iyo warbaahinta madax bannaan.

Dawladdu waxay ku baraarugsan tahay in ay jiraan weriyaal daabacay waxyaabo magac-iyo-sumac ridid ku ah saraakiil dawladda ah, oo uu ka mid yahay Madaxweynaha qudhiisa. Dawladdu waxay rumaysan tahay in ololaha warbaahinta ee si-xun-wax-u-sheegga ah ay hurinayaan, islamarkaasna ay kharash ku bixinayaan xubno siyaasadeed oo ka soo horjeeda is-badalka uu Maamulka Cusub keenay Puntland. Mid kamid is-badalada waaweyn ayaa ah in si aad ugu dhow badalaad buuxda lagu sameeyo Golaha Wasiirada kuwaas oo aan wax is badal ah lagu samayn ilaa markii la asaasay dawlad goboleedka 1998; afar wasiir oo keliya ayaa laga reebay wasiiradii Maamulkii hore. Dawladdu waxay qaadaysaa tallaabooyin ay ku asaasayso xiriir wanaagsan oo rasmi ah ee warbaahinta madaxa bannaan si loo horumariyo xirfadda wanaagsan ee qaybaha warbaahinta.

Maamulka Cusub waxaa ka go’an xoojinta Wasaaradda Warfaafinta si loo xaqiijiyo in ay Dawladdu yeelato aalad warbaahineed oo shaqaynaysa, oo la socota warbaahinta madax bannaan si loo xaqiijyo xirfad wanaagga, xushmada iyo anshaxa warbaahinta. Dawladdu waxay soo jeedisay in la xoojiyo warbaahintii jirtay ee dawladdu maamusho, waxaaana u qorshaysan samaynta warbaahin gaari karta dadweynaha Puntland, si shacabka loola socodsiiyo waxyaabaha ku saabsan siyaasadda dawladda iyo dhacdooyinka kale.

Dastuurka Puntland waxa uu xaqiijinayaa xornimada saxaafada, waxaana Maamulka Cusub uu xaqiijin doonaa in dastuurka, oo hadda dib-u-eegid sharciyeed lagu samaynayo, in ay ku jirto qayb xaqiijinaysa xornimada warbaahinta. Warbaahinta madax bannaan waxay u adeegtaa ayadoo ah xiriirka u dhaxeeya shacabka iyo dawladda, waxaana Maamulka Cusub uu sii wadi doonaa xoojinta xiriirka warbaahinta madax bannaan si loo asaaso bay’ad ku dhisan si xornimo u hadal, isla markaasna la dhawrayo sharciyada maxalliga, xuquuqul insaanka iyo dawlad wanaagga.

**NIDAAMKA DIMOQRAADIYAYNTA |** Maamulka Cusub waxaa ka go'an dib u eegida Dastuurka Puntland, oo ay ku xigto in dadweynuhu codkooda ka dhiibtaan. Labadaas tallaabo oo muhiimka ah waxay saldhig u noqonayaan asaasida nidaamka xisbiyada badan ka hor doorashada 2013, taas oo Puntland u ogolaan doonta in laga gudbo dhibaatada siyaasada ku dhisan qabiilka ee dawladda ka dhigay mid ku salaysan hab qabiil.

Arrintaas ayadoo laga duulayo, Dawladdu waxay magacawday Wasiiru Dawlaha Nidaamka Dimoqraadiyaynta iyo Xiriirka Federaalka kaas oo si gaar ah loogu xilsaaray in uu hoggaanka u qabto nidaamka socda ee dimoqraadiyaynta. Tani waxay tusaale fiican u tahay Maamulka Cusub sida xaqiiqada ah ee ay uga go'aan tahay dhamaystirka nidaamka dimoqraadiyaynta, taas oo dadka reer Puntland ay muddo sanooyin dheer sugayeen.

Doorashadii 2009 ee Puntland waxay ahayd mid taariikhi ah sababtoo ah waxay ahayd mid ka timid dadka degaanka, taas oo ahayd hab siyaasadeed is-badal dhab ah oo ku dhisan nidaam iyo kala dambayn. Sida nabad galyada ah ee xukunka ay ula kala wareegeen madaxweynihii xilka ka degayay mudane Maxamuud Muuse Xirsi (Cadde) oo ku wareejiyay madaxweynaha cusub mudane Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole) waxay noqotay mid si wanaagsan looga soo dhaweeyay degaanka maxalliga iyo heer beesha caalamka. Nidaamkaas sida nabadgalyada ah ee xukunka lagu wareejiyay waxa sidoo kale uu noqonayaa taariikhi iyo mucjiso marka la eego xaaladda ay ku sugan tahay Soomaaliya, maadaama shacabka Puntland u dabaal degeen in si dimoqraadiyad ah xukunka lagula kala wareegay, waxaana madaxweynaha cusub ee Puntland lagu soo dhaweeyay si qiimo iyo xushmad leh.

Dawladda cusub ee Puntland waxay garawsan tahay in xoojinta nidaamka dimoqraadiyayntu uu yahay habka keliya ee horseedaya siyaasad deggan mudada dheer iyo dhaqaale xasilloon. 100-kii Maalmood ee ugu horeeyay Xafiiska, Maamulka Cusub waxa uu Baarlamaanka Puntland waydiistay in Axdiga Qabyada ah ee ay dawladii hore u gudbisay baarlamaanka in dawladda dib loogu soo celiyo si loogu sameeyo dib-u-eegid sharciyeed ka hor inta aan loo gudbin Baarlamaanka, taas oo xildhibaanada sharci dejintu ay aqbaleen.

Nidaamka socda ee dib loogu eegayo dastuurka ujeedadiisu waa in lagu saxo qaabka dhismeedka Dastuur Goboleedka, kaas oo ay adkayd in la akhriyo oo la fasiro, si la isaga ilaaliyo qodobo iska hor imanaya ama is dul saaran. Yoolka ugu dambeeya waa in la soo gudbiyo qoraal la turxaan bixiyay oo ku salaysan laba arrimood: In dhammaan qodobbada ku saabsan arrimo isku mid ah la hoos geeyo hal cinwaan; iyo in qoraalka lagu sameeyo dibu habayn ayadoo habka si guud u hadalka loo rogayo mid si khaas ah uga hadlaya arrinta uu ku saabsan yahay. Dastuurka cusub ee Qabyada ah waxa uu u qaabsan yahay sida soo socota:

Cinwaan I: Qeexida Asaaska ah iyo Yoolka Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya; Ciwaan II: Kafaalo Qaadka iyo Xuquuqda Asaasiga ah ee Qofka; Cinwaan III: Xeerka Dhaqaalaha; Cinwaan IV: Nidaamka Siyaasadeed iyo Qaybaha Asaaska u ah Dawlad Goboleedka; Cinwaan V: Qaab dhismeedka Dawlad Goboleedka (Qaybinta Awooda); Ciwaan VI: Arrimaha Maamulka; iyo Cinwaan VII: Dib-u-habayta iyo Wax-ka-dhimid.

Dawladdu waxay Baarlamaanka u gudbisay miisaaniyadda kumeel gaar ah ee saddex bilood taas oo qayb ka ah nidaamka dimoqraadiga. Tallaabadani waxay caddayn u ahayd aqoonsiga saddex farac ee dawladu ka kooban tahay ee kala baxsan oo siman; Puntland taariikhdeeda marka dib loo raaco, awooda waxaa isku koobi jiray Madaxweynaha si aan waafaqsanayn dastuurka ayadoo siyaasadda dawladda la weecinayo oo aan la tixgalin awoodda dastuuriga ah ee xoojinaya Baarlamaanka (Faraca Sharci dejinta) si uu ula socdo xafiiska Madaxtooyada (Faraca Maamulka).

Yoolka dheer ee dhamaystirka nidaamka dimoqraadiyaynta waxaa ka mid ah samaynta qorshe rasmi ah oo lagu asaasayo nidaam shaqaynaya ee xisbiyo badan si loogu jihaysto waqti cusub oo tartan siyaasadeed oo fikradaha macquulka ah ee kala duwan la soo jeediyo oo la tixgeliyo. Dawladda Puntland taariikhdeeda halka xisbi oo keliya waa meesha ay ka asaasantay dhibaatada siyaasadeed ee curyaamisay dawlad Goboleedka ilaa markii la asaasay toban sano ka hor.

Dawladda Cusub waxay aqoonsan tahay in iska hor imaadkii 2001-2002 ka dhacay Puntland uu ahaa dib u dhac weyn oo la soo dersay nidaamka siyaasdeed ee dhinacan Soomaaliya. Taas oo jirta, waxa kale oo Dawladu ay aqoonsan tahay in Puntland uu wax weyn iska badalay ilaa xilligaas; Doorashooyinkii 2005 iyo 2009 ee ku dhacay sida ammaanka iyo kala dambaynta ayaa Puntland ka dhigaya waqti taariikhi ah ee is-badalka; taas oo muujinaysa sida ay dadwaynahu u doonayaan maamul nidaamsan oo shaqaynaya oo xoog leh, kaas oo difaaca danaha Dawlad Goboleedka oo dhawra qaanuunka/sharciga.

**KOBCINTA DHAQAALAHA |** Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya xaaladda dhaqaale waxay kala siman tahay guud ahaan adduunka kale, maadaama dhaqaalaha adduunka uu hoos u dhac ku yimid sannadkii 2008. Taas oo jirta, Dawladda cusub waxay qaaday tallaabooyin dib loogu soo noolaynayo dhaqaalaha, islamarkaasna dib loogu dhisayo kaabayaasha dhaqaalaha ee halbawlaha u ah degganaanshada dhaqaalaha gobolka. Siyaasadda dhaqaale ee Dawladdu waxa ay ku salaysan tahay nidaamka suuqa xorta ah ee furan si loogu ogolaado kala gooshka badeecadaha, iyo in la xadido xanibaadaha dawladda.

Arrimaha muhiimka ah ee ay ku tallaabsatay Dawladda Cusub waxaa ka mid ah isku dayga in hoos loo dhigo qiimaha isku badalka sarrifka, iyo in la xeeriyo sicir bararka. Markii Dawladdu xilka la wareegtay Janaayo 2009, waxaa 100 USD lagu badalan jiray 3,600,000 Somali Shillings. Maanta suuqyada Puntland qiimaha sarrifka lagu kala badasho 100 USD waa 3,000,000 Somali Shillings. Tani waa is-badal yar laakiin Maamulka Cusub waxaa ka go’an in ay sii wado jidkaas kobcinta iyo soo noolayta dhaqaalaha ayadoo la qaadayo tallaabooyin yaryrar oo keenaya isbadal dhaqaale soo kobcaya.

Maamulka Cusub siyaasadiisa ku salaysan beekhaaminta dhaqaalaha waxay dhaqan galisay qorshe lagu xakamaynayo kharashka ay bixiso dawladdu si loo yareeyo waqtiga lagu dheeli tirayo miisaaniyadda. Maalmihii ugu horeeyay ee soo noolaynta dhaqaalaha, waxa uu maamulku xoogga saaray hagaajinta nidaamka dakhli ururinta si loo gaaro ujeedada dheeli tirka miisaaniyadda. Waxa kale oo ay dawladdu joojisay siyaasadii dhaqaale burubur ahayd ee ku salaysnayd in lacagta Dawladda lagu badalo Doolarka Maraykanka taas oo sabab u noqonaysay in suuqa uu maasheeyo Shilinka Soomaaliga oo xad dhaaf ah, arrintaas oo sabab u ahayd in uu sii xumaado sicir bararkii xad dhaafka ahaa. Isbadalkaasi waxa uu keenay in suuqyada Puntland ay qiimahii maciishadu hoos u dhacaan. Waxaa taas dheer, in Dawladdu ay gebi ahaanba mamnuucday daabacaada Shillinka Soomaaliga; arrintaas oo sanadihii hore ahaan jiray mid halakaysay dhaqaalaha degaanka maxalliga ah.

Wax soo saarka Puntland aad ayuu u hooseeyaa, dhawr sababood oo jira awgeed; sida maal gashi la’aan iyo ku xirnaansho la’aan suuqyada caalamka. Taas oo jirta, Warbixinta Wasaarada Ganacsigu waxay sheegtay in waxa laga dhoofiyo Puntlnad ay aad u hooseeyaan, inkasta oo ay jiraan muuqaalo wanaagsan ee xagga hawlaha ganacsiga la xiriira xoolaha nool ee loo dhoofiyo Bariga Dhexe oo waryar kor u kacay marka la barbar dhigo waqti u dhigma sannadkii 2008. Guud ahaan, hawlaha ganacsiga ee Puntland wax yar ayay kordheen marka la barbar dhigo waqti u dhigma sannadkii hore, sida ay muujisay xog ay ururiyeen Wasaaradda Ganacsiga iyo Wasaaradda Maaliyadda. Taasi waxay qayb ka tahay Dawladda Cusub ee Madaxweyne Cabdiraxmaan Faloole oo kusoo kordhisay nidaam cusub oo is-badalka Puntland ee xagga siyaasadda, dhaqaalaha iyo siyaasadda.

Waxaa intaas dheer, kalsoonida dadka wax iibsanaya oo korortay muddadii Maamulka 100-kii Maalmood ee ugu horaysay Xafiiska. Dawladdu waxay saddex kulan la yeelatay Ganacsatada ka hawl gala Puntland, mar kastana hoggaamiyaasha ganacsatadu waxay muujiyeen rabitaankooda in ay bixiyaan cashuurta si joogto ah. Taasi waxay si gaar ah u muujinaysaa kalsoonida kordhaysa ee ganacsatadu u hayaan Maamulka Cusub ee Dawladda Puntland ee keenay isbadal la xisaabtan leh oo waadax ah, oo ah heer aad iyo aad uga sareeya nidaamkii jiray sanadihii hore. Ganacsatadu waxay muujiyeen sida ay kalsoonida ugu qabaan nidaamka Dawladda ee ku salaysan la xisaabtanka, waxayna garab siiyeen qaab si sax ah loogu ururiyo cashuurta. Ganacsatadu waxay sheegeen sida ay diyaarka ugu yihiin in ay ka qayb qaataan kaabayaasha dhaqaalaha si loo horumariyo dadweyne-u-dhexeeyaha iyo waxa gaarka loo leeyahay ayadoo xiriirka wada shaqaynta ku dhisan lala yeelanayo dawladda. Ganacsatadu waxay soo dhaweeyeen go’aanka Maamulka ee

ah in la xoojiyo Guddiga Ganacsiga iyo Warshadaha ee maxada bannaan. Waxaa taas dheer, Wasaaradda Maaliyaddu waxay kusoo warbixisay in ay yaraatay ka weecashadii canshuurta (ama bixin la’aanta cashuurta) taas oo gaartay meel hoose marka loo barbar dhigo waqtiga la midka ah ee sannadkii 2008.

Guud ahaa, xaaladda dhaqaale ee Puntland si tartiib ah ayay isu badalaysaa ayadoo hareer socota isbadalka siyaasadeed ee uu keenay Maamulka Cusub. Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Ganacsigu waxay sii wadi doonaan wada shaqaynta si ay u asaasaan nidaam qaabaysan oo cashuurta lagaga ururinayo ganacsatada degaanka maxalliga ah. Markii hore canshuur uruurintu waxay ahayd mid liidata oo ku kooban lacagta laga qaado goobaha kastamada. Qorshaha Dawladdu waa xoojinta ilaha dhaqaalahu ka soo galo taas oo qayb ka ah isku dayga socda ee lagu xoojinayo nidaamyada maaliyadda iyo ganacsiga.

**DIB U DHISKA KAABAYAASHA DHAQAALAHA |** Ka hor dagaalkii Soomaaliya (ka hor 1991), intii ay jireen waagii xukunkii dimoqraadiga iyo xukunkii kelitaliska militari, Puntland waxay ahayd qaybta la ilaaway ee ka mid ah Soomaaliya. In badan oo khayraadka dawladda waxaa lagu bixin jiray koonfur, gaar ahaan caasimada Muqdisho, halkaas oo laga dhisay dekedaha, garoonada, jidadka, wershedaha yaryar, jaamacadaha, cisbitaalada iyo xarumaha kale ee dadwaynaha. Gobolada kale oo ka faa'iiday xarumaha kale, sida garoomada caalamiga ah iyo dekedaha waxay ahaayeen Kismaayo iyo Berbera, iyo wershedo yaryar oo laga dhisay magaalooyin ay ka mid tahay Jowhar. Sanadihii 1980-naadkii, xukunkii militariga kelitaliska waxa uu dhisay 750 km oo ah jid ku dhereran woqooyi-koonfur oo isku xira magaalooyinka waaweyn ee Puntland. Marka taas laga soo tago, dhammaan wershadaha kalluunka ee Soomaaliya waxaa laga dhisay Dawlad Goboleedka Puntland, arrintaas oo tusaale cad u ah taariikhda dhaqanka kalluumaysiga ee gobolka.

Maamulka Cusub waxa uu garwaaqsan yahay dib u dhiska iyo dib u habaynta kaabayaasha dhaqaalaha ee hadda ka jira Puntland in ay lagama maarmaan u tahay yoolka dheer ee horumarka ganacsiga. Dekedda Boosaaso, oo ah ubucda ganacsiga Puntland, waxay noqotay dekedda guud ee dhanka woqooyi ee Soomaaliya laga soo bilaabo 1990-naadkii. Hagaajinta qaybaha dekedda intii lagu jiray 100-kii Maalmood ee ugu horeeyay Xafiiska waa tallaabo muhiim ah oo ay qaaday Dawladdu, taas oo qayb ka ah qorshe ballaaran oo lagu bilaabayo dib u dhiska kaabayasha dhaqaalaha ee guud ahaan Puntland.

Warbixinta Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda waxay sheegtay in ay bilowday dib u agaasimidda dekedda ayadoo lagu rakibay nidaam cusub oo nalal ah iyo in dekedda laga nadiifinayo waxyaalaha qashinka ah. Dib u habaynta dekedda intii lagu jiray maalmihii ugu horeeyay Maamulka Cusub waxay asaas iyo dhagax dhig u tahay yoolka dheer ee Dawladda iyo sida ay uga go'an tahay dib u dhiska kaabayaasha dhaqaalaha ee dawlad goboleedka.

Xiriirka wada shaqayn ee waxa dadwaynaha u dhexeeya iyo waxa gaarka loo leeyahay, waxaa tusaale u ah shirkad weyn oo gaar loo leeyahay ayaa waxay Dawladda la ogolaatay in ay soo iibinayso tabeelayaasha calaamadaha haga gaadiidka, kuna rakibto 750 km ee jidka laamiga ah oo isku xira Boosaaso iyo Galkacyo ee sii dhex jibaaxa dhulka Puntland. Calaamadaha gawaarida haga waxaa ka mid ah kuwo muujinaya fogaanta, calaamadaha ammaanka dariiqa sida in la xadido xawaaraha iyo in gawaarida laga xanibo meelaha halista ah wixii ka dambeeya habeen barkii.

Dawladda waxay ku dadaalaysaa samaynta tallaabooyin yaryar ee dib u dhiska iyo maaraynka kaabayaasha dhaqaalaha ee hadda jira taas oo qayb ka ah isku dayga dib u dhiska kobcinta dhaqaalaha ee Dawlad Goboleedka. Maamulka Cusub waxa uu sii wadi doonaa radinta taageero caalami ah si loo casriyeeyo oo loo maarayn karo, islamarkaasna Puntland looga dhiso kaabayaasha dhaqaalaha oo cusub, maadaama kaabayaasha dhaqaaluhu ay fure u yihiin horumarinta dhaqaalaha.

**100-KA MAALMOOD KADDIB |** 100-kii Maalmood ee ugu horeeyay Xafiiska waxay asaaska u dhigeen in Dawladda Puntland ay dejiso qorshe istaraatiijiyadeed oo lagu horumarinayo dhammaan qaybaha Dawlad Goboleedka. Afarta sano ee waqtiga Madaxweyne Cabdiraxmaan Faroole waxa jaaha la saarayaa arrimaha ubucda ah ee ku xusan bogagga sare; waxayna dawladdu qaadaysaa tallaabooyin yaryar si ay u gaarto yoolka kama dambaysta ah ee Puntland ka dhigaya mid isku filan oo leh nidaam shaqaynaya, taas oo leh mustaqbal wanaagsan ee jiilka hadda iyo jiilka xiga ee carruurta ah.

Puntland waxay ku negaanaysaa in ay qayb muhiim ah ka ahaato Soomaaliya, waxayna taageeraysaa isku dayga dib-u-dhiska qaran, ilaa hadda nidaamka dawladeed ee federaalka ayaa samaynaya asaaska dawlad kasta oo mustaqbalka. Maamulka Cusub waxa uu sii wadi doonaa in uu la socdo oo isha ku hayo waxyaabaha ka soo cusuboonaada koonfurta-gobolada dhexe ee Soomaaliya, gaar ahaan caasimadda Muqdisho halkaas oo oraahda “Dawladda Midnimo Qaran” ay si aan la aqoon uga soo muuqatay siyaasadda caalamka iyo warbaahinta, taas oo Puntland ku abuurtay shaki ah in oraahda “federal” si tartiib ah uga suulayso eray bixinta siyaasadeed, islamarkaasna jaah-wareer ku abuuraya nidaamka Federaalka. Dawladda Puntland waxay sii wadi doontaa dadaalka ay ugu jirto xaqiijinta xuquuqda Dawlada Goboleedka in ay siyaasad ahaan madax bannaanaato, iyo in sidoo kale dhulkeeda iyo khayraadkeeda uu dhawrayo nuqulka ugu dambeeya ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya

Bilaha iyo sanadaha soo socda, Dawladda Puntland waxay sii wadi doontaa xoojinta nidaamka socda ee qaybaha kala duwan. Dawladda waxaa ka go’an in ay kordhiso musharka shaqaalaha dawladda, gaar ahaan ciidanka amniga, garyaqaannada, qareennada iyo shaqaalaha qaybaha bulshada iyo dhamaystir barnaamij tababar ee dhammaan xubnaha dawladda. Waxaa intaas dheer, Maamulka Cusub waxa uu sii wadi doonaa raadinta siyaabaha lagu kobcinayo dakhliga dawladda, ayadoo la adeegsanayo deeq-bixiyaal, horumarinta dhaqaalaha iyo ka faa’iidaysiga khayraadka dabiiciga ah.

Dawladdu waxay dhamaystiri doonaa nidaamka dimoqraadiyaynta si Puntland ay awood ugu yeelato inay ka dhacdo cod bixin xor ah oo ay ka qayb galaan dadweynaha oo dhan sannadka 2013. Maamulka Cusub waxa u qorshaysan ogolaanshaha in la asaaso xisbiyo badan oo siyaasadeed labada sano ee soo socota gudahood si loo gaaro ujeedada dawlad wanaagga, islamarkaasna loo dhamaystiro nidaamka dhismaha hay’adaha.

Nidaamka Xeer-beegta Puntland ayaa la xoojin doonaa si uu noqdo unug madax bannaan, sida uu dhigayo Axdiga Dawlad Goboleedka. Waxaa la sii wadi doonaa hirgalinta awood dhiska garsoorayaasha iyo qareenada ilaa xeer-beegtu ay noqonayaan kuwo xubin dawladeed oo madax bannaan oo leh awood sharciyeedka dastuurka oo u tarjuma sharciga si caddaalad ah oo xirfad ku salaysan.

Dawladda waxaa ka go’an in ay dadweynaha la socodsiiso ficillada, siyaasadda iyo go’aanada la xiriira, taas oo qayb ka ah in uu markasta jiro xiriirka bulshada. Aragtida mustaqbalku waxay ku salaysan tahay isku-fillaansho xagga dawladda iyo dhaqaalaha, waxaana guusha yool mudada dheer ay ku xiran tahay hoggaan u qalma, oo garab ka helaya dadka degaanka iyo mid caalami ah, iyo in dadweynaha lagu qanciyo doonitaankooda dawlad xoog leh oo dimoqraadi ah taas oo dawlad goboleedka u jihaysa dhanka horumar miisaaman oo qof kasta ku faano, oo qof kastana uu ku qanacsan yahay.